

Bayaan ka soo baxay shir ay yeesheen qaar ka mid ah Dubabka, dhaqanka iyo culuma udiinka Soomailiyeed ee lagu qabtay Magalad Entebbe, Uganda, 24-26 Juun 2011.

Qaar ka mid ah Duubabka, dhaqanka iyo culuma-udiinka Soomaaliyeed ayaa ka qayb galeen shir magalada Entebbe ee wadanka Uganda, kaas oo ay soo qabanqaabiyeen ururadda kala ah, African Council for Religious leaders, Religion for Peace iyo UNPOS. Shirkaas waxaa looga hadlay wixii kaso baxay shirkii Kampala iyo sidii duubabka, dhaqanka iyo culumaa-udiinka Soomaaliyeed dowr ugu yeelan lahayeen, ugana qeyb qadan lahayeen wada hadalka nabadeed ee socda.

Dubabka, dhaqanka iyo culuma udiinka Soomailiyeed ee meshaas ku kulmay waxay walaac badan ka muujiyeen nolol xumadda iyo dhibaatada haysata bulshadda Soomaaliyeed, sababtaasuna ay tahay dagaaladda joogtadda ah ee wadanka ka taagan, waxaayna ugu baaqeen in ay garabyadda siyaasadda isku hayaahi wadda xajood galaan, aduun waxayna ugu baaqeen in ay tagero deg deg ah in ay gaarsiyaan goobaha ay ka jiraan coladaha iyo abaaraха.

Duubabka, dhaqanka iyo culumaa-udiinka Soomaaliyeed ee halkaas isu yimid waxay soo jeediyeen in la dhisoo gole guurti Soomaaliyeed oo joogto ah, khaasatan koofurta iyo bartamaha Soomaaliya. Guurtidaas oo ka shaqayn doonta, wax alaale wixii khilaafaa bulshada dhexdeeda ah, gacana siinaysa hayaddaha federalka ee ku meel gaarka ah. Dubabka, dhaqanka iyo culumaa-udiinka Soomailiyeed ee halkaas ku kulmay waxay UNPOS iyo bulshadda caalabka ka codsadeen shir balaaran oo lagu qabto muqdisho, ayna ka soo qeyb galaan Dubabka, dhaqanka, dumarka iyo culumadda. Kaas oo looga wada hadlayso sidii loo dhisi lahaa Guurti joogto ah.

Dubabka, dhaqanka iyo culumaa-udiinku waxay xuseen in Puntland iyo Somaliland ay ka jiraan golayaal guurti, waxayna diyaar u yihiin in ay ka fa'iidaystaan waaya'arag nimadooda, wada shaqayna ay la yeeshaan, si loo gaaro dib-u-heshiin dhab ah.

Entebbe, 26 Juun 2011